

# Sunt a unugy ad a dhiiga – ket o a cido SiS

(Iakabyo aashito ah oo kudhex samaysma qulqulka dhiiga sabab laxariirta insulin-ta oo qofka kuyaraata)

## calaamad aha hore:

- Kaadi xad dhaaf ah
- Oon xad dhaaf ah
- Af qalalan
- Sonkorta dhiiga oo kor ukacda

## a Staamo d aran:

- Baahi xad dhaaf ah
- Tamar la'aan
- Neefta oo kudhibta
- Calool xanuun
- Lalabo/matag
- Astaamaha shubanka
- Sunta neefta
- Dareen heer niyad leh, koomo

Somaliska

## goorma ayay taha y inaad dib u cabirt o heerarka qaab dhi Smeedka dhiigaa ga?

Cabir heerarka qaab dhismeedka dhiigaaga marka heerarkan sonkorta dhiigaagu ay noqdaan 14mmol/l ama kabataan, ama markaad xanuun dareento adoon garanayn sababta.

## Sida aad uga j a waab aySo Sonk ort a kaladuwan ee dhiiga kujirt a iy o xeerarka qaab dhi Smeedkadhiiga\*

|                                                            | Sonkorta dhiigu waa 14 mmol/l ama kahoos                                                                                                                                                        | Sonkorta dhiigu waa 14 mmol/l ama kabadan                                                                                                                                      |
|------------------------------------------------------------|-------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------|--------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------|
| <b>Qaab dhismeedyada dhiiga 3.0mmol/l ah ama kasareeya</b> | Halis daran oo keeni karta ketoacidosis. Isla markaba laxariir dhakhtar.                                                                                                                        | Halis daran oo keeni karta ketoacidosis. Isla markaba laxariir dhakhtar.                                                                                                       |
| <b>Qaab dhismeedyada dhiiga 1.5-2.9mmol/l</b>              | Waxaad ubaahan tahay kaarboohaydareetyo degdeg ah iyo sida macquulka ah insulin dheeri ah**. Halis keeni karta ketoacidosis, laxariir dhakhtar.                                                 | Waxaad ubaahan tahay insulin badan**. Raac tilmaamaha ay kusiiyaan kooxdaada sokoroowgu. Halis keeni karta ketoacidosis, laxariir dhakhtar.                                    |
| <b>Qaab dhismeedyada dhiiga 0.6-1.4mmol/l</b>              | Waxaad ubaahan tahay kaarboohaydareetyo degdeg ah iyo sida macquulka ah insulin dheeri ah**. Dib ubiloow lasocoshada sonkorta dhiiga iyo heerarka qaab dhismeedka dhiiga kadib 1-2 saacadoodba. | Waxaad ubaahan tahay insulin badan**. Raac tilmaamaha ay kusiiyaan kooxdaada sonkoroowga. Lasoco sonkorta dhiigaaga iyo heerarka qaab dhismeedka dhiiga kadib 1-2 saacadoodba. |
| <b>Qaab dhismeedyada dhiiga oo kahooseeya 0.6mmol/l</b>    | Haddii aysan jirin astaamo muujinaaya ketoacidosis, raadi waxyaabaha kale ee xanuunkaaga keenaaya.                                                                                              | Majiraan astaamo muujinaaya ketoacidosis. Lasoco sonkorta dhiigaaga iyo heerarka qaab dhismeedka dhiiga markale kadib 1-2 saacadoodba.                                         |

\*Sida Kucad Tilaamaha Talo Bixinta Shaqada Caafimaadka ee ISPAD oo soo baxday 2009. Tilmaamaha qaranka Sweden ee sharaxaada heerarka qaab dhismeedka dhiiga wali lamasoo daabacin.

\*\*Heerarka qaab dhismeedka jirku way kici karaan saacadaha koobaad kadib markaad insulin dheeri ah iskudurto, laakiin intaas kadib hoos ayay usoo dhacayaan.

## SONKORTA DHIIG YARIDA

**Kor ukac xawli kusocda (Sonkorta dhiiga oo kahoosaysa 3.5-4.0 mmol/l)**

### ASTAAMAHA:

- Dhidid, madax xanuun, caajis
- Gaajo
- Gariiritaan
- Wadno garaac badan
- Qofka oon waxba diirada saari karin
- Xanaaq, dabeecad xumo
- Dawakhsanaan

### DAAWAYNTA:

- **Marka astaamuhu yar yihiin** qaado kaniiniyada dextrose, ama cuntooyika carbohydrates ka sida cabitaanada sonkorta leh ama juuska.
- **Haddii xanuunku daranyahay** ama haduu jiro wax kabadan 10 - 15 daqiiqo, kuceli/qaado cadad dheeraad ah oo carbohydrates ah.  
Haddii cuntadaada xigta aad ucunaysi mudo kafog 30-45 daqiiqo waxaad ubaahan kartaa cunto fudud si aad uga hortagto in xanuunku markale kugusoo kaco. Hacabin cabitaano haddii aadan wax liqi karin.
- Markaad qabto astaama sida jirago' ama miyir dabool, **si degdeg ah ulaxiriir dhakhtarka/isbitaalka!**

### WAXYAABAHA SABABA:

- Cunista sonkor badan
- Cunto yaraan, cuntada oo ladib dhigo
- Shaqada jirka ayadoon laqaadan carbohydrates dheeraad ah ama insuliinta oo layareeyo
- Alkolada

## SONKORTA DHIIGA OO KACDA

**Ketoacidosis, kor ukac hooseeya**

### ASTAAMAHA:

- Oonka xad dhaafka ah
- Cadadka kaadida oo bata
- Daalka
- Arag xumada
- Oomiteed xumada
- Lalabo
- Matag
- Calool xanuun
- Afka oo soo ura ama acetone
- Naqaska oo qofka kudhaga

### DAAWAYNTA:

- Cabir sonkorta dhiiga iyo ketones ka kujira dhiiga
- Sii bukaanka insulin iyo, haday muhiim tahay, carbohydrates degdeg ah
- Gee qofka isbitaal ama daryeel caafimaad

### WAXYAABAHA SABABA:

- Infakshanka, heer kulka
- Insulin kufilan oon lacunin
- Cadad khaldan oo insulin iyo cuntooyin ah oo lacunay
- Cilad kajira xididada insulinta jirka siiya
- Daawada SGLT-2 ee xakamaysa ayaaqarin karta ketoacidosis

dhakhtarkayga/kalkaalisadayda Lambarka taleefoonka